

Tallaal xoojin ah oo la siinayo dhammaan dadka ka weyn 65 sano

Dhammaan dadka ka weyn 65 sano waxa loo fidinayaa irbad xoojin ah oo ah tallaalka koroonaha. Dawladda ayaa arrintaas go'aamisay. Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) ayaa loo xilsaaray in uu qiimayn ku sameeyo in shaqaalaha caafimaadkana loo fidiyo irbad xoojin ah.

Hay'adda Dawooyinka ee Yurub (EMA) ayaa qiimayn ku samaysay ku tallaalista irbad xoojin ah oo ah tallaalka BioNTech-Pfizer, waxaanay Isniintii 4-tii Oktoober go'aamisay in irbad xoojin (Booster) ah la siin karo dadka ka weyn 18 sano marka ugu yaraan lix bilood laga joogo xilligii qofku qaatay irbaddii labaad.

– Waxa jira calaamado muujinaya in uu hoos u dhacayo difaacii dadka waayeelka ah ka difaacayay in ay aad ugu xanuunsadaan cudurka. Ujeedada laga leeyahay in irbad xoojin ah la siiyo dadka waayeelka ah ayaa ah in kor loo qaado difaaca ka ilaalinaya in ay aad u bukoodaan haddii ay qaadaan covid-19, iyo in ay helaan difaac ka sii badan inta hadda oo ka difaacaya noocyada cusub ee fayrasta iyo in la sii dheeraayo muddada la difaacan yahay, ayuu yidhi wasiirka caafimaadka iyo daryeelka Bent Høie.

FHI waxa uu soo jeediyay in dadka qaadanaya irbadda xoojinta ah loo kala horreysiiyo hab waafaqsan nidaamkii da'da ku salaysanaa, si la mid ah sidii tallaalistii caadiga ahayd. Taas oo ka dhigan in marka hore tallaalka loo fidinayo dadka deggan xarumaha bukaanka iyo dhammaan dadka ka weyn 85 sano, haddana lagu xigsiiyo dadka jira 75-85 sano ka dibna dadka jira 65-74 sano.

Tallaalka hargabka

Degmooyinku si wacan ayay u awoodaan tallaalista dadka, waxaana laga codsaday in ay heegan u ahaadaan bixinta irbaddo xoojin ah. Si kastaba, haddii caqabado ku yimaadaan awoodda tallaalista ee degmooyinka maadama ay

toddobaadyada soo socdana dadka ka tallaali doonaan hargab-xilliyeedka, waa in ay sidan u kala hormariyaan dadka la tallaalayo:

1. Irbadda koowaad ee la siinayo dadka aan tallaalnayn
2. Irbadda labaad ee la siinayo dadka hal irbad ku tallaalan
3. Irbadda saddexaad ee la siinayo dadka difaaca jidhkooda hoos loo dhigay ama uu hoos u dhacay
4. Tallaalka hargabka
5. Irbad xoojin ah oo la siinayo dadka deggan xarumaha bukaanka iyo dhammaan dadka ka weyn 65 sanno

– Ma la rabo in bixinta irbadda xoojinta ay caqabad ku noqoto bixinta tallaalka hargabka. Waa muhiim in la qaato tallaalka hargabka waayo waxa la filayaa in hargabka sannadkani u dillaaci doono si ka xoog weyn sidii hore. Dadka waayeelka ah waxay u nugul yihiin in ay aad ugu xanuunsadaan hargabka, ayuu tilmaamay Høie.

FHI wuxu soo jeedinayaa in aan hal mar la wada qaadan tallaalka hargabka iyo tallaalka koroonaha. Waxa wacan in hal toddobaad u dhexeeyo.

Difaac aad u wacan

Tallaallada ku jira barnaamijka tallaalka koroonaha ee Norway waxay noqdeen kuwo qofka si wacan uga difaaca infekshanka koroonaha ee daran, islamarkaana boqolkiiba 85 dadka Norway deggan ee ka weyn 18 sanno ayaa si buuxda u tallaalan. Weli waxa socda tallaalidda dadka jira 12 sano ama ka weyn. Dadka difaaca jidhkoodu aad u hooseeyo ayaa durba loo fidiyay irbad saddexaad oo tallaalka ah.

Tallaal innagu filan ayaynu haysanaa. Bixinta irbadaha xoojinta ah ee tallaalka koroonaha waxa la fulin doonaa kala wareegga oktoober-nofember, ka dib marka la dhammeeyo tallaalka hargabka. Degmooyinku way ku kala duwanaan doonaan xilliyada ay dhammaynayaan tallaalista dadka kala duwan.

– Xilliga ay degmadu u gudbayso tallaalista qayb kale oo ka mid ah dadka waayeelka ah waxa lagu salaynayaa halka ay hawlaha tallaalista ee degmadu marayaan, oo laguma salaynayo go'aanno heer qaran ah, ayuu tilmaamay Høie.

Waddamo door ah ayaa bilaabay in ay bixiyaan irbaddo xoojin ah. 3,2 milyan oo israa'iiliyiin ah ayaa lagu tallaalay irbad xoojin ah. Danmark ayaa irbad saddexaad u fidisa dadka deggan xarumaha bukaanka, waxaanay ka fekerayaan in ay u fidiyaan dadka waayeelka ah iyo dadka nugul. Iswiidhan waxay soo jeedisay in irbad xoojin ah la siiyo dadka ka weyn 80 sanno iyo dadka deggan xarumaha bukaanka.

31 milyan oo tallaal ah oo la gaadhsiinayo waddamo kale

Norway waxay caalam ahaan ka shaqaysay in kor loo qaado soosaarka tallaallada lana kordhiyo tallaalka la gaadhsiinayo waddamada kale ee la marinayo ACT A (Access to Covid-19 Tools Accelerator) iyo iskaashiga Covax. Norway waxay si firfircoon uga shaqaysay in la sii gudbiyo qaybo ka mid ah tallaalka laga helo wadashaqaynta taallaal-soo-iibsiga ee Yurub, waxaanay aasaastay xoghayn arrimaha sharciga ka caawisa waddamada Midowga Yurub iyo Guddiga Midowga Yurub markay diyaarinayaan heshiisyo ku saabsan sii gudbinta tallaalka.

– Kadib markii ay Norway ka caawisay dhanka sharciga waxa hadda heshiis galay Janssen oo soo saara tallaalka iyo isbahaysiga tallaalka ee Gavi. Heshiiska ayaa keenaya in Norway ay bilaha soo socda 3 milyan oo ah tallaalka Janssen sii marin doonto iskaashiga Covax, ayuu yidhi Høie.

Wadar ahaan waxay Norway gacan ka geysanaynaa in 31 milyan oo tallaal ah la gaadhsiiyo waddamo kale.

– Waa suuragal in labo wax la is barbar wado. Waxaynu difaaci karnaa dadkeena innagoo islamarkaana gacan ka geysanayna in waddamo kalena ay tallaal helaan. Waxay Norway haysataa tallaal ku filan oo noqon kara tallaal xoojin ah oo loo fidanayo dadka waayeelka ah. Wixii hadda ka dambeeya waxa hadafku yahay in

aynaan dalban tallaal ka badan inta aynu u baahan nahay xilliga markaa la joogo, ayuu hoosta ka xarriiqay wasiirka caafimaadka iyo daryeelku.

In qofku aqbalo irbad xoojin ah oo loo fidiyay wax dhib ah ma ku keenayso dadka haysta shahaado koroonaha. Irbadda saddexaad ee la siiyo dadka difaacoodu hooseeyo iyo irbad *booster* ah waxay shahaadada koroonaha ka muuqanayaan iyagoo ah 3/2 (irbaddii 3-aad ee 2 labo irbadood).

Irbad dheeraad ah oo la siinayo dadka Janssen ku tallaalan

Wasaaradda caafimaadka iyo daryeelka ayaa go'aamisay in la yeelo sida FHI soo jeediyay oo ah in irbad xoojin ah oo ah tallaallada mRNA loo fidiyo dadka lagu tallaalay hal irbad oo tallaalka Janssen ah. Tallaalka Janssen waa tallaal hal irbad keliya laga qaato.

– Waxa muuqata in dadka si buuxda ugu tallaalan hal irbad oo Janssen ah ay helaan difaaca infekshannada iyo cudurka koroonaha oo ka yar inta ay helaan dadka lagu tallaalay labo irbadood oo ah tallaallada mRNA ah. FHI ayaa taas darteed soo jeedinaya in la siiyo hal irbad oo ah tallaallada mRNA si loo kordhiyo difaaca. Dadka raba in ay qaataan irbad dheeraad ah oo ah tallaallada mRNA waxay la xidhiidhi karaan goobaha tallaalka ee degmada ay joogaan, ayuu yidhi Høie.

Waxa Diiwaanka taallallada Qaranka, SYSVAK, ka diiwaangashan in ka badan 4000 qof oo deggan Norway oo lagu tallaalay tallaalka Janssen

Macnaha ereyada

Irbad saddexaad	Irbad tallaal oo dheeraad ah oo la siiyo dadka difaacoodu aad u hooseeyo ee la filayo in uu yar yahay difaaca ay ka helayaan labo irbadood oo tallaalka ah.
Irbad xoojin ah	Waxa la siin karaa dadka la filayo in ay difaac wacan ka helayaan labo irbadood. Waxa la siinayaa irbad dheeraad ah si difaaca wacani u sii jiro
Irbad Booster ah	Waxay la mid tahay irbadda xoojinta ah.